- U raadi ilmahaaga buugta sawirada ah ee aan ereyada lahayn, ka dibna ilmuhu ha kuu sheego sheekada raaci karta sawirada meesha ku yaal.
- Kula ciyaar ilmaha ciyaarta ereyada laxniga wacan leh.
- La akhri buugta leh ereyada isku noqnoqda, waxa laga yaabaa ilmahaagu inuu kaala qayb galo sheekada, waxa laga yaabaa ilmahaagu inuu ka helo maktabada wax kaste oo xiisa gelinaya oo ay ka midyihiin treenada, raha ama haraha, beeraha xoolaha iyo inkale oo badanba.

Ku Taageerida ilmaha Afkiisa Hooyo

Caruurtu waxay u baahan yihiin luqadooda kowaad inay si wanaagsan u bartaan, tani waxay ka caawinaysaa inay bartaaqn luqadda Ingriisiga, caruurtu waxa kale oo ay u baahanyihiin inay ku hadlaan luqadooda kowaad:

- Si ay u yeeshaan ama u helaan nolol qoys oo awood badan leh.
- Inuu ka qayb qaato waxyaalaha komunitiyada ama mujtamaca uu ku nool yahay ka dhacaaya.
- Inuu la xidhiidho ama la sheekeysto waalidkii ama ehelkiisa ka waaweyn.

Waxa yaalaha waalidku ku caawin karaan ilmahoogu waa kuwan:

- Inaad kula hadasho luqada aad sida wacan ama sida wanaagsan u taqaano adigu.
- Inaad la hadasho limaaga waqtiyada aad wax qabanayso po dhan, waqtiga cuntada, marka aad u maydhaysid, markaa aad wax u soo iibinaysid ilmahaaga.
- Adigoo ilmahaaga luqaddaada ugu sheegaya sheekooyin, ciyaaro iyo heeso
- Inaad usheegto ilmahaaga sheekooyin, ciyaaro ama heesaha luqadiina.
- Inaad la qorto ilmahaaga warqado oo aad ku qortaan luqadiina, inaad la akhrido ama aad la akhrisato, buugta, hadii aad heshid buug caruurta ah oo ku qoran luqadiina.

Raising Readers - Preschool
Somali 6/2003

Barbaarinta Akhristeyaasha Skuulka

ka hor

Fikrado iyo hal abuur sahlan oo aad ku hormarin kartid jacaylka waxbarasho inaad ku abuurto ilmahaaga ama caruurtaada Dariiqo fudud iyo fikrado sahlan oo aad ku gaari karto horumar iyo jacaylka akhris oo aad ku abuurto caruurta.

www.kcls.org

KING COUNTY LIBRARY SYSTEM

Barbaarinta akhristaha…

Sanadada ka horeeya caruurtu inta aanay iskuul gelin. Waqtiyo aad uqiimo baddan inaad la wadaagto farxadda wax akhriska caruurtadda ama ilmahaaga. U diyaarinta ilmuhu inuu wax akhriyo weyka weyntahay xarfaha oo u barto oo keliya. Lahadalka, dhegeysiga, iyo adiga oo u heesa caruurta ayaa iyaguna aad muhiim u ah. Halkan waxaan kuugu hayaa dariiqado aad hore ugu marin karto caruurtaada, sidii aad u jecleysiin lahayd wax akhriga:

- Wax u akhri maalin walba caruurtaada.
- U samee kaarka maktabadda ee maktabadda, marmarna booqo maktabadda deegaanka.
- U keen ilmaha buugaag ama buug caruurtaadu si ay guriga ugu akhriyaan.
- La kulan shaqaalaha maktabadda si aad wax uga ogaatid buugaagta wacan ee ay caruurtu akhristaan.
- Kuna dhiiri caruurtaada iany sheekeeyaan xubnaha qoyska ama saaxiibadood ama saaxiibadood.
- Istimaal buraanburro, heeso ama heellooyin si aad ugu wehel yeeshid hawshooda maalinimo.
- Haku arkeen ilmahaagu ama caruurtaadu adiga oo wax akhriyaaya, oo tus sida wax loo akhriyo. Tani waxa tusaysaa caruurtra wax akhrigu inuu muhiim yahahy.

Maxaad ka filaysaa ilmahaaga yaryar wax akhriskiisa ama wax akhriskooda sanadada ka horeeya iskuulka. (Astaamaha guud ee akhristaha iskuulka ka hor)

Ilmo kasta wuxuu leeyahay xirfado wax akhrineed oo xaddiyo kala duwan leh. Halkan waxan kuugu hayaa waxyaale laga yaabo in ilmahaagu kugu arkaan, ka ugu horeeyaana waxa weeye.

- Wuxuu bilaabayaa isku xidhiidhin ama xiriir hadalada iyo ereyada qoran.
- Wuxuu bilaabayaa inuu aqoonsado ereyada iyo dhawaqyada fudud.
- Inuu ku ciyaaro ereyada uuna ka sameynayaa hadalo qoslo leh, inuu ku farxo sheekooyinka laxniga leh, heelooyinka.
- Wuxuu bilaabayaa inuu u fadhiisto sheekooyin dhaadheer uuna jecleysto inuu akhriyo.
- Wuxuu jecleysanayaa inuu wax akhriyo keli, isaga oo isticmaalaaya sheekooyinka sawirada leh.
- Weydii lana soo qaad adiga oo ugu celcelinaaya sheekadii uu akhriyay.
- Wuxuu kaloo ka heli doonaa dhegeysiga sheekada uu ka helo oo loogu soo cel celiyo.
- Wuxuu jeclaan doonaa buugaagta sawirada aadka u tafa tiran leh.
- Wuxuu bilaabayaa inuu ku raaxeysto sheekooyinka aad iskugu murugsan.
- Wuxuu dooran doonaa buugaagta uu isagu jecelyahay.

Xirfadaha Akhrinta Hal abuurka

- Sii ilmahaaga xoog warqado ah ama xaashiyo cad cad ah una ogolaw in ay sawiraan sheeko inta aad adigu qoraysid sheekada ay sheegayaan.
- Bilow gabayo adigoo u isticmaalaya hab la ciyaar luqadeed! Ka yeel mid sahlan oo kaftan leh. Haddii aad gabayada u soo bandhigto si xiiso ku dheehan yahay isla markiiba ilmuhu way kugula soo biirayaan.
- Marka aad aragto in ilmuhu uu xiiso u hayo akhriska diyaarna u yahay, sii kaadhka xuruufta ku qoran tahay ama waraaqo, ama xarfo birqabato leh si uu ugu ciyaaro.
- U samee xuruufta la dareemi karo iyo qaabab. U oggolow inuu dhaq dhaqaajiyo gaballada saaxadda la dareemi karo dul saaran iyo inuu kuu sheego sheeko.
- Ka soo qayb geli sheekada waqtiga iskuulka ka horreeya ee lagu qabto maktabadda deegaanka.
- Kula ciyaar kulana hees cajaladaha muusikada iyo kuwa suxuunta elektaroonigga ah ee leh heeso iyo dhawaq lala qabsan karo.
- Bar ilmahaaga ciyaaraha farta, ciyaaraha carruurta iyo wixii la mid ah.
- Ku dhiirrigeli ilmahaagu inuu yeedhiyo waraaq awoowehiis ama ayeeyadiis ama asaaxaabtiisa loo dirayo. Qor ka dibna boostadda ugu dir.
- Buugaan hadiyad ahaan ugu deeq ilmahaaga waqtiyada fasaxyada iyo ciidaha dhalashada.

Sii socota